

Tilmaamaha Wada Xaajoodka Shacabka

Tilmamaahani waxaa loogu talo gelay dadka doonaya inay ka hadlaan madasha wada xaashoodka Dadka qaybta ka ah ajandaha kulanka Gudida Maamulka Dugsiga.

Gudida Maamulka Dugsigu waxay ku dadaalayaan inay muwaadiniinta siiyaan fursado lagu dhagaysto oo ay ka hadli karaan oo ay qiimayn karaan, taas oo ah inta uu dhigayo sharcigu iyo xeerka Degmada oo ay leedahay wakhti macquul ah, goobteeda iyo qaabka xadidaada.

15 daqiiqo ee ugu danbeeya ee kulan kasta oo mudnaanta ah, kaadhka cida khudbadaynaysa ayaa laga heli karaa goobta kulanka ee muwaadiniinta si ay isku duwaan geliyaan oo ay u bixiyaan faalo ku saabsan hadii mawduuca gaarka ah lagu darayo ajandaha iyo in kale. Dadka waxaa laga waydiin doonaa magacooda, lambarka taleefanka, ciwaanka boosta, dugsiga ay ka socdaan, iyo macluumaad kooban oo waxa ay doonayaan inay ka hadlaan ama su'aasha ay qabaan ee ay doonayaan in looga jawaabo. Marka uu bilaabmo Wada Hadalka Shacabka WAX kaadh ah oo dheeraad ah lama aqbalayo.

Sidoo kale, dadka muwaadiniinta ee doonaya inay wax u sheegaan Gudida Maamulka Dugsiga ee mawduuc gaar ah waa inay sheegaan ajandaha shayga kaas oo ay doonayaan inay ka hadlaan oo waxay heli doonaan fursad ay kaga hadlaan inta lagu jiro qaybta Wada Hadalka Shacabka kahor inta aan la gelin Kulanka Ganacsi. Sharciga wada hadalka Shacabku waa in la sameeyo Gudida oo waa in ay daba socotaa wada tashiga.

Shuruuca Faalada Shacabka waa sida soo socota:

1. Dadka hadlayaa waa inay buuxiyaan kaadhka cida khudbadaynaysa kahor inta ayna hadlin.
2. Wakhtiga: sadex daqiiqo ayaa loo ogol yahay qof kasta oo hadlaya. Wakhti dheer ayaa la isasiin karaan taas oo uu bixin karo Gudoomiyaha Gudidu.
3. Gudoomiyaha Gudida (ama cida uu wakiishay) ayaa gudoominaysa Wada Xaajoodka Shacabka oo waxa uu u yeedhi doonaa dadka hadlaya, oo siday usoo kala horeeyeen ah.
4. Markiiba hal qof ayaa hadli doona si loo dhagaysan karo.
5. Qaybta Wada Hadalka Dadka waxay qaadan doontaa wax ka badal 25 daqiiqo isu gayn.

Gudida Maamulka Dugsigu waxay danaynayaa faaladaada oo waxay kuu dhagaysan doonaan si taxadir leh laakiin ma jawaabayaan ama arrinka lagagama doodi doono wada hadalkan. Xubnaha gudidu waxay waydiin karaan su'aal ay doonayaan in wax loogu iftiimiyo, laakiin wax go'aan ah ma gaadhi doonaan. Jawaabaha Gudida Maamulka Dugsiga iyo/ama maamulka waxaa lagugu siin doonaa laba todobaad kadib kulanka.

Faalada iyo isdhaxgalka u dhaxeeya xubnaha Gudida iyo shacabka waxaa la filanayaa inay ku salaysnaato qadarin, shurmad iyo xirfadnimo, iyo furfurnaan. Gudoomiyaha Gudida ayaa ka masuul ah xaqiijinta isdhaxgalka kulmada ee heerarka oo waxay uu diidi doonaa wixii aan munaasab ahayn.

In qof, barnaamij, ama koox uu waarero qof la hadlaya Gudidu lama aqbali karo oo waxaa loo diidayaa qofkaasi inuu la hadlo Gudida. Maadaama oo uu jiro sharciga sirta macluumaadku in magac qof lasoo qaadaa way ka baxsan tahay nidaamka. Dadka hadlaya ee diida inay u hogaansamaan shuruucda ama mudada wakhtiga waa laga joojin doonaa inay hadlaan.

Iyada oo ku xidhan tirada dadka ka qayb galaya dhagaysiga, Gudida Maamulka Dugsigu waxay xaq u leedahay inay soo rogto xadidaad sida loogu baahdo si loo helo kala socod, waxku oolnimo, iyo fursado cadaalad ah oo dadka soo bandhigaya lagu dhagaysto.

Fadlan waxaad la socotaa in Wada Hadalka Shacabku ay tahay inay dhamaato 7:25 si Xubinta Gudida iyo Maamulku ay ugu heli karaan wixii kale ee kulmo shaqo ee kale.